Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa – Daraasad Kooban No.4

Dhaxalka barakaca taariikhda dheer iyo koboca magaalada Hargeysa

(Maarso 2019) Daraasaddan waxa ay soo koobeysaa natiijooyinkii ugu muhiimsanaa ee mashruuca cilmibaarista ee Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa ee la sameeyay intii u dhexeysay 2017-2019. Mashruuca Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa oo ay maalgeliyeen DFID iyo ESRC waxa uu diiradda saarayay aragtiyada iyo khibradaha dadka barakacay oo deegaan ka dhigtay afarta magaalo ee Baydhabo, Boosaaso, Hargeysa iyo Muqdisho. Afartan magaalo waxa ay hoos tagaan maamullo siyaasadeed oo kala duwan, laakiin waxa ay wadaagaan dabeecado guud. Marka koowaad, waa magaalooyin si xowli ah u koraya dhanka cabbirka iyo cufnaanta, midda labaad, oo ah mid kamid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee keenay kobocan, waa isu guurguur xooggan oo gudaha dalka ah oo ay sababtay barakac khasab ah. Inkastoo waxyaabo badan oo la xiriira xaaladda dhaqaale iyo bulsho ee dadka barakacay ay wadaagaan magaalooyinka, waxaa jira kala duwanaan dhinaca khibradda taariikheed ee 'magaaleynta xeryaha barakacayaasha' iyo dadaallada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee lagu maareynayo xeryaha barakacayaasha iyo goobaha kale oo ay degaan barakacayaasha. Qoraalkan kooban waxa uu diiradda saarayaa khibradda barakacayaasha Hargeysa, oo ah caasimadda Jamhuuriyadda madaxa bannaan balse aanan weli la aqoonsan ee Soomaaliland.

Sawir qaade: Hodo, State House

Natiijooyinka ugu muhiimsan

-Goobaha caanka ah oo ay ku badan yihiin barakacayaasha Hargeysa waxa ay markii hore ahaayeen xero barakacayaal oo ay degaan dadka soo laabtay waxana ay isku beddeleen deegaanno aan rasmi ahan oo ay dad badan ku nool yihiin.

-Dadkii soo laabtay bilowgii sanadihii 2000 waxa deegaannadoodii la degay dad wakhtiyo dambe kasoo barakacay Soomaaliland gudaheeda iyo Soomaaliya, saboolka magaalada oo aanan awoodin in ay iska bixiyaan kirada guryada, iyo barakacayaal Soomaali iyo ajaanib isugu jirta ee dalal kale ka yimid.

- Mustaqbalka deegaannada ku yaalla gudaha magaalada ee aanan rasmiga ahayn ma ahan kuwo la hubo in ay sii jiri doonaan maadaama qaar badan ay u dhaw yihiin hanti maguurto ah oo qaali ah.

-Mashaariic ayaa laga fuliyay si barakacayaal dib-u-dejin loogu sameeyo goobo cusub oo ku yaalla bannaanka magaalada. Balse tiro aad u badan oo barakacayaal ah ayaa weli ku nool dhismayaal aan rasmi

ahayn ee ku yaalla bartamaha magaalada sida xowliga ah u koreysa.

-Xiriirro hantiyadeed oo kala duwan ayaa kasoo if-baxay deegaannadan, dadkii wakhti hore degayna waxa ay bilaabeen in ay ka kireeyaan ama ka iibiyaan guryahooda iyo goobihii ay deganaayeen dad cusub. Marka lagasoo tago dhulka qiimihiisu jaban yahay ee goobahan barakacayaasha, deegaameynta cusub waxa sidoo kale soo jiitay fursadda ah in ay noqon karaan qeyb kamid ah barnaamijka dib-u-dejinta.

- Xaaladda adag ee dadka ku nool dhismayaalka aan rasmiga ahayn waxa sii xumeeyay suuqa tartanka loogu jiro ee xoogsatada, iyo xeerar shaqaale dhaqan gal ah oo aan jirin.

- Dumarki waxa ay inta badan dhabarka u ritaan culeyska dhaqaale ee quudinta qoysaskooda.

Taariikhda magaalada

Marka la barbar dhigayo saddexda magaalo kale ee cilmibaaristan laga sameeyay, qaababka barakaca iyo dejinta barakacayaasha Hargeysa waa mid ka duwan magaalooyinka kale. Burburkii baahsanaa ee Hargeysa ka dhacay sanadkii 1988 ee duqeyntii dowladdii mili-tariga ee uu hoggaanka u ahaa Siyaad Barre waxaa ka dhashay in ay barakacaan inta badan dadkii ku noolaa Hargeysa. Qaar badan oo dadkaas kamid ah waxa ay u qaxeen dhanka xuduudda Itoobiya.

Kadib markii la aasaasay Jamhuuriyadda Soomaali-land, dadkii way soo laabteen iyagoo taageero ka he-laya dowladda iyo hay'ado caalami ah. Qaar badan oo kamid ah dadka soo laabtay – gaar ahaan qoysaskii saboolka ahaa oo ay hantidoodii oo dhan ku burbur-tay dagaalladdii iyo duqeymihii – waxa ay deegaan ka dhigteen dhul dowladeed, tusaale ahaan dhulka u dhaw xaruntii hore ee Gumeystihii Ingiriiska ee lagu magacaabo State House (eeg sawirka kore oo ay Hoodo qaadday). Deegaankan teendhoyinka ka dhisan yihiin waxa uu sanadihii dambe isku beddelay dhisma-yaal aan rasmi ahayn oo ay dad badan ku nool yihiin oo u badan guryo ka sameeysan jiingado, iyo teend-hooyin. Guryahan waxa la dhisay xilli ay magaalada si xowli ah u fideyso taasoo ka dhalatay nabadda iyo xasiloonida iyo sidoo kale kobaca dhaqaalaha.



Sawirrada uu qaaday Satellite-ka waxa ay muujinayaan kororka dadka ku nool xerada State House – 2002/2017 (Isha: Google Earth)

Qaabab kale oo guurguritaan ayaa qeyb ka qaatay kororka dadka ku nool Hargeysa iyo nawaaxigeeda sida State House, Daami ama Cakaaro. Goobaha kale oo Hargeysa loogasoo hayaamay ahaa ah Muqdisho iyo koonfurta Soomaaliya. Tan iyo sanadihii 1990-aadkii iyo wakhtiyo kala duwan oo colaado jireen, dadka u dhashay beelaha kasoo jeedo Soomaaliland waxa ay usoo guurayeen waqooyiga si ay badbaado u helaan noloshoodana dib ugu qaabeeyaan.

Sanadihii dambe, waxaa dadkaas kusoo biiray dad kale oo cusub oo isugu jira Soomaali iyo dad aan Soomaali ahayn ee kasoo hayaamay Itoobiya, iyo dad kale oo ay soo barakicisay abaaro ka dhacay gudaha Soomaali-land iyo deegaanno ka baxsan xuduudaha Soomaali-land.



Khariidad: Peter Chonka

Qaabka cilmibaarista loo sameeyay iyo dadka ka qeyb qaatay

Guud ahaan, 2017/2018 cilmibaarayaasha Amniga iyo Dhaqdhaqaaqa waxa ay wareysteen 120 qofood oo rag iyo dumar isugu jira, intooda badanna ahaa dad barakacayaal ah oo ay da'doodu iyo qabiilladoodu kala duwan yihiin kuna kala nool afarta magaalo. Ilaa 40 qofood oo barakacayaal ah (10 qofood magaalo kasta) ayaa loo qeybiyay kaamirooyin ay u isticmaaleen in ay ku qaadaan sawirro ka turjumaya nolosha maalinlaha ah. Sawirrada ku lifaaqan qoraalkan kooban waxaa qaaday dad barakacayaal ah. Dadka laga wareystay Hargeysa waxa ay ku noolaayeen Cakaaro, Daami, Maxamed Mogle, State House, iyo cooshado u dhaw waadiga – dhammaantood waxa ay qeyb ka ahaayeen barakacayaal iyo barnaamijyo dib-u-dejin. Sida ay khariiradda muujineyso, dadka la wareystay waxa ay ka kala yimaadeen goobo kala duwan ee gudaha Soomaaliland ah iyo goobo ka baxsan Soomaaliland.

Natiijooyinka cilmibaarista

Dadka aan wareysannay waxa ay wajahayaan cadaadis dhaqaale oo xooggan waxana ay ku nool yihiin xaalad adag. Dadka aan wareysannay waxa ay ku celceliyeen shaqo la'aan waxana ay sharraxeen sida ay halgan ugula jiraan helista nolol maalmeedka. Qaar badan waxa ay ku tiirsanaayeen shaqo xoogsi maalinle ah waxana ay u nugul yihiin in xooggooda si xadgudub ah loo isticmaalo oo shaqo badan lagu qabsado lacag yarna la siiyo. Barakacayaasha waa qeyb aad muhiim ugu ah shaqaalaha waxana ay kaalin ku leeyihiin kobaca magaalada. Balse shaqadoodu waa mid muruqmaal ah oo aanan joogto ahayn, mar kastana shaqadooda lama bogaadiyo. Qaar kamid ah dadka aan wareysannay waxa ay ka shaqeynayeen ganacsiyo ay gaar u leeyihiin sida tukaanno ku yaalla xaafadda, halka qaar kalena sheegeen in ay qaateen tababar xirfad-barasho ah oo ay hirgeliyeen hay'ado maxalli ah iyo kuwo caalami ah. Sicir bararka ayay ku sheegeen dadka la wareystay in uu culeys ku yahay nolosha qoysaskooda.

Dadka ku nool guryaha aan rasmiga ahayn ee ku yaalla Hargeysa waxa ay helaan adeegyo badan oo aasaasi ah. Tusaale ahaan, daryeel caafimaad iyo waxbarasho ayay ka helaan goobo u dhaw deegaannadooda. Sikastaba ha noqotee, caqabado la xiriira helitaanka daryeel caafimaad ayaa lasoo weriyay in uu kajiro dhinaca bixinta lacagta daawada. Inkastoo ay Dowladda Soomaaliland ka dhigtay dugsiyada hoose lacag la'aan sanadkii 2011, haddana qaar kamid ah dadka la wareystay waxa ay sheegeen in ay dugsiyada dowladda weydiiyaan lacago, qaar kale ayaa ka hadlay caqabado ka heysta helitaanka lacagaha dheeriga ah sida buugaagta iyo qalimaanta caruurta.

Raga iyo dumarka waxaa siyaabo kala duwan u saameeya duruufaha dhaqaale ee deegaannadooda. Dumarka ayaa inta badan dhabarka u rita culeyska dhaqaale ee ugu weyn ee ah quudinta qoyska. Waxa ay ku shaqeeyaan lacag yar, waxana ay hayaan masuuliyad dheeri ah oo ah daryeelka caruurta, biyo soo arooridda, iyo shaqada guriga. Raga inta badan ma awoodaan in ay quudiyaan qoysaskooda. Rabshadaha qoyska waa mid aad u xooggan, inta badanna waxa ay ka dhalataa muran la xiriira dakhliga qoyska.

Dumar badan oo la wareystay waxa ay ahaayeen kuwo lasoo furay, in dumarka iyo caruurta uu ka tago odayga reerkana waa mid ku badan goobaha barakacayaasha ee cilmibaarista laga sameeyay.

Sawir qaade: Naciimo, Hargeysa

Suuqa dhulka aan rasmiga ahayn iyo buunbuunin loo sameeyo dib-u-dejinta ayaa soo ifbaxday. Gudaha deegaannada aan rasmiga ahayn waxa ay dadka wakhtiga fog deganaa bilabeen in ay sheegtaan lahaanshaha dhulka (gaar ahaan dhulka dowladdu leedahay) waxana ay qeyb kamid ah ka kireeyaan kana iibiyaan dad cusub. Suuqa ka ganacsiga dhulka aan rasmiga ahayn waa uu is-beddelay waxana uu la jaanqaaday sare-u-kaca qiimaha dhulka ee magaalada. Xaalad kale oo qeyb ka qaadatay sare-u-kaca deegaannada ay barakacayaashu deggan yihiin ayaa ah rajada dadka ee ah in ay qeyb ka noqdaan barnaamijyada dib-u-dejinta mustaqbalka.

Hubaal la'aan ayaa ka jirta mustaqbalka deegaannada barakacayaasha ee u dhaw dhulka qiimihiisu sareeyo. Barnaamijyada dib-u-dejinta waxaa sameeyay dowladda hoose iyo hay'ado caalami ah si ay dadka uga fogeeyaan bartamaha magaalada una dejiyaan xaafado cusub oo laga dhisay duleedka magaalada, oo ay kamid tahay Digaale oo u dhaw gegida diyaaradaha Hargeysa. Dib-u-dejinta noocan ah waxaa xaqiijiyay dadkii la wareystay ee baaqi kusii ahaa bartamaha magaalada waxana ay muujiyeen in ay doonayaan in ay qeyb ka noqdaan dib-u-dejinta mustaqbalka. Wada sheekeysi lala yeeshay dadka dib-u-dejinta loogu sameeyay Digaale, waxa kasoo baxday in walaaca ugu weyn oo ay qabaan uu yahay in aanay heysanin wadooyin iyo gaadiid ay ku tagaan magaalada. In ay suuqa shaqada magaalada ka fogaadeen iyo in ay lumiyeen xiriirkii bulsho ayay ka dhawaajiyeen in ay yihiin labo caqabad ee ka dhashay dib-u-dejinta, sidaas darteed qaar kamid ah dadkii dib-u-dejinta loo sameeyay waxa ay dib ugu laabteen xaafado ku yaalla gudaha magaalada waxana ay kireysteen guryo goor dhaw la dhisay. Qorshayaal dib-u-dejin hor leh lagu sameynayo ayaa jira. Helitaaanka dhul ayay saraakiisha dowladdu sheegeen in ay tahay caqabadda ugu weyn ee ku hor gudban qorshaha dib-u-dejinta.

Tilmaamaha kala sooca sharci iyo farsamo ee 'barakacayaasha' oo ay isticmaalaan dowladda iyo hay'adaha aan dowliga ahayn ayaa adag in la hirgeliyo, waxana ay mugdi gelineysaa khibradaha kala duwan ee tahriib iyo barakac oo ay isugu jiraan dadka ku nool goobaha barakacayaasha ee Hargeysa. Tusaalaha Hargeysa waxa uu muujinayaa in kala sooca dadka ee 'barakacayaal', 'qaxooti', 'dadka soo noqday', 'xoog lagu barakiciyay', ama 'guuritaan qofku go'aansado' ay tahay mid aad u adag in ay muujiso khibradaha kala duwan ee barakac iyo dib-u-dejin. Dadka barakacayaasha ah ee Soomaaliland iyo Soomaaliya waxa ay leeyihiin intooda badan aqoonsiyo dhowr ah oo isugu jira kuwo qaran iyo kuwo ka hooseeya, waxana ay weli aqoonsiyo kale ka abuurmayaan sheegashada cusub ee maamulka iyo metelaadda siyaasadda. Dadka ku nool magaalada Hargeysa, tusaale ahaan, ee ka barakacay dagaalladdii Soomaaliya waxa ay inta badan ku noolaayeen dalalka deriska ah tobaneeyo sano, waxana ay kusoo laabteen Soomaaliland – oo ah maamul aanan jirin markii ay qaxayeen. Dadka kasoo laabtay xeryaha barakacayaasha ee iyagana sanadihii 1990-aadkii ka barakacay dagaalladii sokeeye iyo abaarihii ku dhuftay koonfurta Soomaaliya, iyo dadkii ka qaxay abaarihii iyo dagaalladdi ka dhacay Soomaaliland, Soomaaliya iyo Itoobiya ayaa ku wada nool guryo aan rasmi ahayn kuwaasoo ay kusii biireen saboolkii magaalada oo aanan awoodin in ay iska bixiyaan kirada guryaha magaalada oo sii kordhaya. Inkastoo kala sooca dowladdu sameysay inta badan si isku mid ah u isticmaalaan hay'adaha dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn, waxa khatar ka dhalan kartaa kala sooc ay ku sameeyaan dadka barakacayaasha ah. Cilmibaaris dheeraad ah ayaa loo baahan yahay in laga sameeyo sida kala sooca ku saleysan siyaasadda, qabiilka iyo jinsiga uu kaalin ugu leeyahay xiriirka bulsho ee goobaha barakacayaasha iyo deegaannada ka baxsan.

Isbarbar dhig iyo laga bartay goobaha kale ee cilmibaarista laga sameeyay

Qorshaha dib-u-dejinta Hargeysa waxa uu uga duwan yahay dib-u-dejinta laga sameeyay Boosaaso dhowr siyaabood. Marka koowaad, xaafadaha cusub ee la abuuray waxa ay ku kala yaallaan meelo kala fog fog ee duleedka magaalada ah, taasoo ka duwan Boosaaso oo hal goob ay isugu tageen bara-

kacayaasha. Marka labaad, qaar badan oo kamid ah dadka ku nool gudaha magaalada Hargeysa waxa ay kasoo jeedaan beelaha waaweyn ee deggan magaalada, waxana loo aqoonsan yahay in ay yihiin muwaadiniin Soomaaliland u dhashay, waxa ayna xaq u leeyihiin in ay degaan magaalada si ay caawinaad u helaan. Xaaladdan waxa ay ka duwan tahay midda ka jirta Boosaaso oo ay barakacayaasha intooda badan aanay kasoo jeedin beelaha deegaanka, sidaas darteedna ma heystaan aqbalaad lamid ah xuquuqda dadka deegaanka. Xaaladdan waxa si cad u muujiyay dad ku noolaa Boosaaso iyo Puntland oo loo musaafuriyay gobollada koonfurta Soomaaliya. Maadaama ay jiraan kala duwanaantan la xiriirta xuquuqda, iyo difaaca xooggan oo ay dadka deegaanka ka helaan beelahooda ku sugan Hargeysa, dadaallada lagu doonayo in dad badan oo gudaha magaalada deggan lagu dejiyo duleedka magaalada waxa ay u baahan tahay wadaxaajood iyo wadatashiyo adag in lala galo dadka deegaanka.

Guud ahaan, barakacayaasha Hargeysa waxa ay wajahaan khataro aan badneyn oo la xiriira xasarado ka dhasha dowladda iyo xoogag aan dowladda ahayn. Dambiyada yaryar iyo dhaca weli waa arrin heysata barakacayaasha, laakiin dadka la wareystay waxa ay sidoo kale sheegeen in xaafaddooda aanay ka khatar badneyn xaafadaha kale ee magaalada. Dood ku saabsaneyd badqabka jirka waxa ay dadka la wareystay ku muujiyeen in xasilooni sarreyso ay ka jirto Hargeysa iyo Soomaaliland. Dad badan oo lawareystayaasha kamid ah waxa ay ku sifeeyeen Hargeysa magaalo fideysa, waxana ay sheegeen in culeysyada shaqaale iyo helitaanka adeegyada bulshadu yihiin caqabadaha ugu waaweyn.

Dadka la wareystay ee ku sugnaa Hargeysa, si ka badan magaalooyinka kale, waxa ay ka hadleen tiro badan oo qaxooti aanan Soomaali ahayn ee soo dagaya goobaha ay deggan yihiin, gaar ahaan dadka ay ku sifeeyen 'Oromo' oo ah magac loo isticmaalo dadka aan Soomaalida ahayn ee ka yimaada Itoobiya. Inkastoo qaar kamid ah dadka la wareystay ay sheegeen in xaafadda ay ku milmeen dad Oromo ah, horumarka magaaladana qeyb ka yihiin, qaar kale waxa ay xoogga saareen kala duwanaanshaha bulsho iyo saameynta taban oo ay ku leeyihiin dhaqanka Soomaalida. Tani waxa ay muujineysaa xiisad dhalin karta xasarad. Takoorka dadka kale, sikasta oo loo qeexaba, waxa ay u badan tahay in ay sii xumeyso doodda diiradda saareyso kala duwanaanta iyo isku dayadii dowladdii hore ee tarxiilka 'ajaanibta'.

Natiijooyinka cilmibaaristan waxaa loo jeediyay maamullada dowladaha hoose, hay'adaha gargaarka caalamiga ah, bulshada rayidka iyo ka qeyb qaatayaasha cilmibaarista ee afarta magaalo iyadoo bandhig sawirro iyo doodo la sameeyay bishii Janaayo ee sanadka 2019. Faafaahin buuxdo ee mashruuca iyo bandhigyada waxa aad ka heli kartaa halkan: http://securityonthemove.co.uk/events/ Bandhigyo lamid ah waxaa lagu qabtay Oslo (Febraayo 28), London (Maarso 14), iyo Nayroobi (Abriil). Haddii aad qabto su'aal la xiriirta cilmibaarista fadlan la xiriir Jutta.bakonyi@durham.ac.uk ; peter.chonka@kcl.ac.uk ; manedle100@gmail.com ama kirsti.stuvoy@nmbu.no

[Warbixintan waxaa turjumay Tayo Translations]